

Daawooyinka Opioids ka waxaa kamid ah: Side ayaan ku heli karaa naloxone?

Heroin, fentanyl, iyo daawooyinka loo qaato xanuunka:

Vicodin (*hydrocodone*)
OxyContin (*oxycodone*)
Dilaudid (*hydromorphone*)
MS Contin (*morphine*)

Percocet
Methadone
...iyo kuwo kale

- Haddii uu qof qaato daawooyinka opioids ka oo ka badan inta jirkiisu maxili karo, way ku dhiman karaan, neefta ayaana ku dhigi karta, iyo wayna naf bixi karaan.
- Isticmaalida saaidka ah waxay qaadan kartaa sikino illaa saacado.
- Qof walba oo isticmaalka daawooyinka opioids wuxuu si qalad ah u qaadan karaa kuurooyin dheeraad ah.

Naloxone (Narcan®) waa daawo dhakhtar soo qoro oo si ku meel gaar ah u joojisa saameynta opioids kana caawisa qofka inuu mar labaad bilaabo neefsashada.

Naloxone waxaa laga qaadan karaa muruqa ayadoo la adeegsanaayo cirbad ama ayadoo buufinta sanka. Waa fududeyd waana ammaan in la isticmaalo.

Booqo stopoverdose.org si aad u ogaato in naloxone laga heli karo farmashiga, dakhtarka, ama waaxda caafimaadka ee kuu dhaw.

Khataraha isticmaalka xad dhaafka ah ee Opioid ka

- **Dib u bilaabida opioids kadib marka la joojiyo.** Dulqaadku wuxuu ku dhacayaa dhowr maalmood gudahood.
- **La isticmaalida opioids isku mar** aalkool, benzodiazepines/ "daawooyinka walwalka" kookeen, ama methamphetamine. Qaadashada daawooyin badan isku mar waxay walwal ku abuuraan sambabada iyo wadnaha.
- **Isticmaal kasta oo heroin ah** sababo la xariira daahirnimadiisa ballaaran.
- **Qaadashada kaniini kasta oo uusan dhakhtar kuu qorin.** Micna ma lahan meesha aad ka hesho, waxay u badan tahay inay ku jirto fentanyl.
- Qaadashada daawooyin xanuun oo si iskaa ah u qaadatay **had iyo jeer ama qaadashada kuurooyin dheeraad ah** oo ka badan intuu dhaqtarku kusoo qoray.
- Xanuunka wadnaha ama sambabada.

Dhimasha sababtu u tahay daawooyinka Fentanyl waxay kusii badanayaan Gobalka WA.

Fentanyl waxay kasii tan badan tahay daawooyin kasta oo ah opioid iyo kuurooyinka dheeraadka ah waxay u dhici karaan si dhaqso ah. Ma arki kartid mana dhadhamin kartid fentanyl. Gobalka WA, inta badan kaniinada aan laga soo qaadan farmashiga waa fentanyl. Sidoo kale waxaa laga heli karaa budada/boodharada.

Kheyraadka

Khadka Soo Kabashada Washington (caawimaada khalalaaasaha 24 saacdood & gudbinta)

warecoveryhelpline.org, 1-866-789-1511

Adeeg bixiyaasha Suboxone/buprenorphine
tinyurl.com/bup-locator

Macluumaad ku saabsan daawooyinka xakameeya opioid ka dheeraadka ah iyo hoos u dhigida khatarta isticmaalida saaidka ah ee opioid ka

learnabouttreatment.org

Buug yarahaan ma aha baddelka tababarka jawaabta qaadashada kuurooyinka dheeraadka ah ee dhammaystiran ee dakhtarka adeeg bixiyaha caafimaadka ah ama baraha caafimaadka. Haddaad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah booqo: stopoverdose.org

Waxaa soo saaray (dib loo eegay 6/2021):



Turjumaada waxaa taageeray:

Washington State Health Care Authority



Isticmaalka xad dhaafka ah ee Opioid ka



Haddii qof aad taqaan uu qaadanaayo kaniiniyaasha opioid ka, fentanyl, ama hirowiin...

....ma taqaan waxa la sameeyo haddii ay qaataan qiyaas xad dhaaf ah?

Macluumaadkan wuxuu kaa caawin karaa inaad badbaadiso nolal.

stopoverdose.org

Tallaabo ka qaadista cadadka xad dhaafka ah ee opioid-ka

1


Fiiri: middaan ma noqon kartaa isticmaalka xad dhaafka ah ee opioid ka?

Fiiri oo dhageyso:

- Neefsasho gaaban ama neefsasho la'aan
- Gurxan, xiiq, ama khuuro
- Maqaarka oo qaboow noqdo, jacjac yeesha
- In bishimaha ama cidiyuhu yihiin baluug ama gareey
- Dhallooyinka kaniiniyada, cirbado, ama aalkohool



Iskuday inaad toosiso:



- Rux-rux oo magacooda ku dhawaaq.
- Gacmahaaga si xoog ah u saar kor nafta xabadkooda oo riix.

Haddii aysan kicin, waa inaad isla markiiba sameyso falcelin!

2

Wac 911.



- Sheeg meesha aad joogto iyo in qofku uusan neefsaneyn.
- Looma baahna inaad wax ka sheegto darooga ama daawooyinka.

3

Sii naloxone oo billoow samatabixinta neefsashada.

- **Sii naloxone.** Raac tilmaamaha ku qoran baakada ama agabka samatabixinta marka uu qof qaato kuurooyin dheeraad ah.
- **Billoow samatabixinta neefsashada.**
- Haddii aysan xaaladoodu caadi noqon 3-5 daqiiqo, sii **kuurada labaad ee naloxone. Joogtee samatabixinta neefsashada.**



Samee samatabixinta neefsashada xataa haddii aadan haysan naloxone. Ogsijiintu waa muhiim!

4

La joog.

- Haddii ay bilaabaan inay kacaan ayna neefsadaan, la joog.
- **La joog illaa iyo inta kooxda gargaar caafimaadka ay imaanayaan.** Naloxone waxay jirka ka baxdaa 30-90 daqiiqo gudahood. Marka ay jirka ka baxdo, qofku wuxuu mar labaad joojin karaa inuu neefsado.
- Haddii ay qasab tahay inaad ka tagto, dhig meel ay kusoo kabsan karaan meel loogu imaan karo.



Sharciga Ilaalinta Dadka (Good Samaritan Law)

Haddii aad u hesho gargaar caafimaad qaadashada kuurada dheeraadka ah ama ku sumoowga khamriga, adiga iyo dhibbanaha laguguma dacweyn karo isticmaalka daawada, haysashada aad haysataan, ama haddaad cabtaan idinkoo da' yar.



WA RCW 69.50.315

Samatabixinta neefsashada



- Madaxa kor u taag. Kor u taag garka. Qabo sanko.
- Sii **2 neefsasho oo dhaqso ah.** Xabadku waa inuu kor usoo kacaa.
- Kadibna sii **1 neefsasho oo aayar ah 5 tiisikin oo walba.**
- **Joogtee** illaa ay bilaabaan neefsasho ama illaa kooxda gargaarka caafimaadka imaanayaan.

Goobta Dib usoo kabsashada

